



WE EXPECT EXCELLENCE

WE INNOVATE



WE EMBRACE EQUITY



WE COLLABORATE



Macluumaadka Cimilo Xumida ee Waalidka iyo Mas'uuliyiinta Iskuulada Degmada Beaverton

Xiritaanka iskuulka ama go'aanada waqtiga daahida waxaa caadiyan lagu sheegi doonaa warbaahinta waxaana lagu dhajin doonaa website-ka Degmada, Facebook iyo Twitter 5:30 a.m. iyo fariinta SchoolMessenger, email-ka ama taleefanka (waxay kuxirantahay dooqaada).

Waxaan ku dhiirigelineynaa qoysaska inay u sameeyaan gaadiid iyo go'aaminta imaanshaha ilmohooda oo ku saleysan qiimeyntooda xaaladaha safar ee goobta ay joogaan.

Marka dhamaan iskuulada degmada iyo xarumaha xiran yihiin

- Dhamaan hawlaha/xafladah maalintii iyo fiidkii ee maalmaha xiritaanka waa la joojinayaa.

Marka Iskuulka furistiisa 2 saacadood did u dhaco oo basaskuna ku socdaan jidad baraf ah

- Iskuulada furistooda laba saacadood ayaa dib u dhacayaan.
- Fasallada/barnaamijyada soo socda waa la joojinayaa
 - Fasalada (early intervention) ee gelinka hore
 - Fasalada xanaanada ee gelinka hore
 - Mihnadaha caafimaadka & barnaamijka baabuurta
- Barnaamijka Terra Nova waa la jooji maalintaa oo dhan.
- Bas ma u imaan doono xaafadaha dugsiyada hoose ee Bonny Slope, Nancy Ryles iyo Sato.
- Adeegyada basaska lama siin doono ardayda McKinney-Vento ee ku nool meel ka baxsan degmada.

Marka dugsiyada waqtigiisu ku socdo basaskuna ay marayaan wadooyinka barafka

- Dhammaan dugsiyadu waxay ku shaqeeyaan jadwal maalmeedka caadiga ah.
- Bas ma u imaan doono xaafadaha dugsiyada hoose ee Bonny Slope, Nancy Ryles iyo Sato.
- Barnaamijka Terra Nova waa la joojiyaa maalinta oo dhan.
- Haddii saadaalinta cimiladu ay ku baaqdo in cimilada ay hoos u dhacdo, degmadu waxay hirgelinaysaa waddooyinka barafka loogu talagalay waqtiga sii deynta ee gelinka dambe.

Marka xaaladaha cimiladu ay khasabto in iskuuladu waqti hore la kala diro/iskuulada la xiro.

- Waxaan kugu dhiirigelineynaa inaad la socoto bogga internetka ee BSD, School Messenger iyo warbaahinta maxaliga ah si aad u hesho macluumaad faahfaahsan.
- Dhammaan hawlaha/xafladaha maalintii iyo fiidkii waa la joojiyay.